

Bukaanada loo qoray goojada Ryaltris™ ee xasaasiyada sankaa

Sida loo qaato goojada sankaa Ryaltris


Garoojada lagu talliyay waa labo buufis oo lagu shubo sanqo walba subixii iyo fiidkii.

Marwalba u isticmaal daawadaan sida uu kuu tilmaamo dhaqtarkaaga ama farmashiistaha.

Xog dheeraad ayaad af Iswiidhish uga helayaa barta fass.se




1



Diyaari buufiskaaga sankaa

Waxaad ruxdaa dhalada ugu yaraan 10 il biriqsi oo kadib ka saar daboolka illaalada.

2



Isticmaalka koobaad

Marka ugu horeysa ee aad isticmaasho goojada sankaa la iskaga buufiyo sankaa (ama haddii ay aheyd wax ka badan 14 maalmood tan iyo markii ugu dambeysay ee aad isticmaashay), waxaad u baahaneysaa inaad ku diyaarisid adoo ku buufinaya hawada illaa aad ka aragtid ceeryaamo wanaagsan.

3



Afuuf sankaa

Si tartiib ah u afuuf sankaa si aad u baneysid sanqadaada.

4




Buufiska

Ku xir hal sanqo fartaada, si taxadar leh u geli fida mida kale oo ku tilmaam dhinacyada dibada sankaa.

Waxyar horay u dhaqaaji madaxaaga, si degdeg ah hoos ugu riix hal jeer adoo si tartiib ah uga neefsanayo sankaa.

5



Neefsashada

Ka neefso afkaaga.

Dhinaca kale uga gedi tilmaamo buuxdo.

Bukaanada loo qoray gojada Ryaltris™ ee xasaasiyada sankka

Wixii warbixin dheeraad ah oo sida loo isticmaalo buufiska sankka Ryaltris, ka fiiri buug-yaraha la socdo baagad walba. Si taxadar leh u aqriso oo ula xiriir dhaqtarkaaga ama farmashiistaha haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan nadiifinta, waxa la sameeyo haddii aad isticmaashay wax badan ama aad ilowdo inaad qaadatid Ryaltris, iyo wax ku saabsan saameynada caafimaadka suurtoogalka ah ama fass.se (warbixinta oo af Iswidish ah).

Warbixinta iyo tilmaamaha waxaa laga soo qaatay buug-yaraha Ryaltris.

Diyaari buufiskaaga sankka

- Waxaad ruxdaa dhalada ugu yaraan 10 ilbiriqsi. Kadib ka saar daboolka.
- Markii ugu horeysay ee aad isticmaasho buufiska sankka, waa inaad ku diyaarisid bamka adoo ku buufinayo hawada.
- Saar fartaada koowaad iyo farta dhexe labada dhinac midkood sankka iyo suulkaaga dhalada hoosteeda.
- Iska wareeji sankka, kadibna riix oo siidaa bamka 6 jeer illaa aad ka aragto buufis fiican.
- Bamka hadda waa la diyaariyay oo diyaar ayuu u yahay isticmaalka.
- Haddii ay ka badan tahay 14 maalmood tan iyo markii ugu dambeysay ee aad isticmaasho buufiska, dib u diyaari dhalada buufiska adoo bangareynayo buufiska labo jeer illaa buufis fiican ka soo baxdo.

Isticmaal buufiskaaga sankka

- Waxaad ruxdaa dhalada ugu yaraan 10 ilbiriqsi isticmaal walba ka hor (subaxii iyo fiidkii).
- Si tartiib ah u afuuf sankkaaga si aad u baneysid sanqadaada.
- Ku xir hal sanqo fartaada oo si tartiib ah u geli fiida buufisk sanqada kale, adoo waxyar ku tilmaamayo dhinaca dibada sankkaaga.
- Waxyar horay u dhaqaaji madaxaaga, si degdeg ah hoos ugu riix hal jeer adoo si tartiib ah uga neefsanayo sankkaaga.
- Ka neefso afkaaga.
- Ku celi tallaabooyinka 3 illaa 5 oo garoojada buufiska labaad oo isla sanqadaas ah.
- Ku celi laba buufis sanqada kale.

Si aad uga fogaatid in sanqada ay xinibanto, isticmaalka kadib ku qalaji safaleeti nadiif ah ama istiraasho oo dib ugu celi daboolka.

Keydinta buufiskaaga sankka

- Ku haay daawadaan meel aysan carruurta ka arki karin ama aysan ka gaari karin.
- Isticmaal ka hor inta aysan taariiqda dhacitaanka ee ku tilmaaman dhalada iyo kaartoonka DHACITAANKA kadib.
- Ha qaboojin.
- Dhalada waa in lagu isticmaalaa labo bilood gudahood ee ka bilaabaneyso furitaankii koowaad.

Geey daawooyinkaaga haray iyo weelashada ebarka ah farmashi si loo baabi'yo.

Ryaltris™ 25µg mometasone furoate/600µg olopatadine, buufiska sankka, daawo loogu talagalay dadka weyn iyo carruurta da'dooda ka weyn tahay 12 sanno si loogu daaweeyo astaamaha daran ee sankka ee la xiriirto xasaasiyada sankka.

Shirkada masuulka ka ah: Orion Pharma AB,
www.orionpharma.se.

Marwalba aqri buug-yaraha iyo warbixinta baakida ku jirto.



Xog dheeraad
ayaad af Iswiidhish
uga helayaa barta
fass.se

